

# Kuleyliyeyaasha kaydinta habeenkii

Macluumaad ku saabsan Kuleyliyeyaasha kaydinta habeenkii iyo sida ay u shaqeeyaan iyo inta lacag kaaga bixi karta

Kuleyliyeyaasha kaydinta waxay ku shaqeeyaan kaydinta kulaylka ay dhaliso koronto habeenkii ah oo jaban oo sii daaya kulaylkana maalintii.

Kuleyliyeyaasha kaydinta badankooda waxay ku rakiban yihiin gidaar waxayna u egyihiin hiitarrada. Waxay isticmaalaan koronto si ay u kululeeyaan "Labanka" dhoobo gudaha ugu jirta ah habeenkii. Kadibna si tartiib tartiib ah ayay u sii daayaan kulaylka si ay gurigaaga uga dhigaan diirimaad maalinta xigta.

## Kuleyliyeyaasha kaydinta habeenkii ma qaali baa?

Kuleyliyeyaasha kaydinta habeenkii micnaheedu waa inaad ka faa'iidaysan karto qiimaha hoose ee kortnadda waqigay jaban tahay si aad u kululeyso gurigaaga waxaa loogu yeedhaa habkaasi korontada jaban "Economy 7".

Tani waa tacriif koronto halkasoo korontadu habeenkii aad uga jaban tahay tacriifta caadiga ah ee maalintii - waayo korontadu maalintii waa qaali.

## Sideen u isticmaalaan kuleyliyaha kaydinta habeenkii?

Kuleyliyeyaasha kaydinta ayaa leh dhowr kontarool. Goobta soo gelka kulaylka ayaa kuu ogolaanaysa inaad xakamayso xadiga kulaylka kuleyliyaha aad ku kaydsanayso habeenkii. Tani waa muhiim sababtoo ah, heerka korontadu wuu jaban yahay habeenkii, ma jirto markaa sababa aad qiimo

Kuleyliyeyaasha kaydinta oo dhan waxay leeyihiin kontaroolada wax soo galista kuleeylka iyo ka bixista kuleeylka-inkastoo laga yaabo inaysan u ekaan kuwan oo kale



sare loogu bixiyo wax ka badan inta aad u baahan tahay.

Haddii maalintii oo dhan kulayliyahu shidan yahay , marka kulaylkii kaydasana wuu dhamaanayaa, waxaa haboon inaad si tartiib tariib ah u gaabiso kulayliyaha, oo aad habeenkii ula soo hadho qayb kaydka ah. Markaad guriga ka maqan tahayna ama markaad seexto habeekiina waa inaad aad u naaqsto ama damiso ,waayo haddii kale kulaylkii lacagtutu kaaga baxday ayaa la waayi doonaa.

Kuleyliyeyaasha kaydka qaarkood waxay leeyahiin kontrool la yidhaa "Boost" oo aad kuleeyl dheraada ku helayso lakiin ma isticmaalo korontada jaban ee habeenkii ,ta maalintii ayuu isticmaala ee qaaliga ah. Waxaa la isticmaalaan marka kaydku kaa dhamaado oo qudha. kuleyliyeyaasha kaydka oo dhami kuwa danbe iyo kuwa horeba waxay isticmaalaan kontarooladda galista kuleeylka iyo ka bixista



## Noocyadda Kuleeyliyaasha kaydka ah iyo sida ay Lacag kuugu beekhaamin doonaan

### 1. Kuleeyl kaydiyayaasha casriga ah

Waa qaar tamarta si fiican u kaydiya si fududna loo kontroolo, moodooyinka cusub ayaa muddo dheer kuleeylka hayn kara, waxaanay leeyahiin dahaadh ilaaliya oo kuleeylku wuxuu bixi karaa uun marka loo baahdo, Moodooyinka cusub qaar kamidi waxa kaloo ay leeyahiin heer kul-beeg iyo saacado kontrool oo lagu maamulo barnaamijka ama Abka moobaylkaaga. Taasi oo ka dhigan in kulaylka lasii dayn doono wakhtiga adiga kugu haboon (Tusaale ahaan markaad subaxii hurdada ka kacdid) Haddii aad kuleyliyaha kaydka oo cusub ku bedasaho kaagii hore waxa laga yaabaa in lacagta kaaga bixi jirtay ay 10% kuuso hadho.

### 2. Kuleyliyayaasha kaydinta kulaylka ee sarreeya

Kuleyliyaashan moodada danbe ah ayaa waxa kaloo ay ka qaab wanaagsan yahiin kuwii hore. Waxaa kaloo ay leeyahiin waxyaabo badan oo dheeradda, Kuleyliyaashani si cajiiba ayeey u kaydiyaan kuylaylka iyagoo isticmaalaiya hab casri ah oo ay ku ogaanayaan malinta soo socota inta loo baahana yahan kuleeyl iyagoo cimillada ka sahaminaya(marka waxba haka werwerin inaad kolba kontaroolka eegto adigu).

Moodooyinka haynta kulaylka sare waxaa ka mid ah kuleyliyayaasha Quantum (laga bilaabo Dimplex/Creda iyo Heatstore), Elnur (Gabarron) Ecombi HHR kululeeyayaasha iyo Stiebel Eltron SHS iyo kala duwan ee SHF. Haddii aad iska bedesho kuleyliyayaasha hore ee gabooabay waxay wanaajin kartaa qiimeyn Shahaadada Waxqabadka Tamarta (EPC) ee gurigaaga.



Kuleyliyayaasha kaydinta casriga ah waxay u muuqdaan kuwo aad u qaab wanaagsan.

### Talooyinka ku saabsan kuleyliyaha kaydinta iyo sida biilasha hoos loogu dhigo

1. Kontaroolka laga xakameeyo in kulaylku guriga galoo waan in EBER la gaadhsiiyo habeenkii markala seexanayo ama markaad guriga ka baxdo.
2. Kontroolka kordhintu kulaylka ee “Boost” waad isticmaali kartaa , lakiin wuxuu isticmaalaa korontadda maalintii ee qaaliga ah , sidaa darteed waxad isticmaashaa inta kayda kuugu hadhay marka hore intaadan “Boost” furin.
3. Ka fogoow intaad isticmaasho hiitaro dheeraad ah , waxaa fiican inaad buuxsato kaydka oo aad habeenkii furato halka uu kasoo galoo kuleeylku si aad u kaydsato.



St James Court  
St James Parade  
Bristol BS1 3LH  
0117 934 1400  
cse.org.uk  
info@cse.org.uk

We're a charity (298740) supporting people and organisations across the UK to tackle the climate emergency and end the suffering caused by cold homes.

Our Home Energy Team offers free advice on domestic energy use to people in central southern and southwest England.

#### Contact us:

PHONE 0800 082 2234

EMAIL home.energy@cse.org.uk

See all our energy advice pages at [www.cse.org.uk/advice](http://www.cse.org.uk/advice)